

App-ka mobaylka ee **evvie** waa hab cusub oo lagu diiwaangeliyo/duubo wakhtiga aad la shaqaynaysid Ka qaybgalayaasha. Waa hab fudud oo degdeg ah oo hubin doona in wakhtiga aad shaqayso si sax ah loo duubay. Aynu ku socono in kastoo talaaboo yinka qaarkood oo ugu diyaarinayo isticmaalka app-ka oo aan duubo shaqadaada kowaad.

#### Soo deji Appka – iPhone ama iPadka

1. Fur App Store-ka.
2. Raadi "Evvie"
3. Ka raadi app-ka lagu magacaabo **evvie**, muuqaalka App-ku waa xarafka A oo buluug ah oo leh khad qaloocsan.
4. Ku Soo deji app-ka Taleefoonkaaga.

#### Soo deji App-ka aaladaha Android

1. Fur app-ka Google Play.
2. Raadi "Evvie"
3. Ka raadi app-ka lagu magacaabo **evvie**, muuqaalka App-ku waa xaraf buluug ah oo A oo leh khad qaloocsan.
4. Soo deji app-ka Taleefoonkaaga.

Hadda oo aad haysatid app-ka, waxaad diyaar u tahay inaad bilowdo duubista wakhtigaaga shaqada. Bixiyaha FMS waa inuu mar hore iimayl kuugu soo diraa tilmaamo ku saabsan samaynta koontada **FMSOne**. Waxaad u baahan tahay inaad haysatid **FMSOne** magaca-kugelisti iyo furiihiisa (username iyo password) si aad u isticmaasho app-ka moobaylka **evvie**.

Haddi aanad weli samaysan magaca ku gelista **FMSOne**-kaaga, fadlan dib u eeg xaashida tilmaamta samaynta taas ka hor inta aanad isku dayin inaad gasho app-ka moobaylka ee **evvie**. Appku wuxuu ugu shaqeeyaa si isku mid ah labada aaladooda ee Apple iyo Android.

#### Gelida saxiixida App-ka

1. Fur app-ka.
2. Guji badhanka buluuga ah ee FMS.
3. Qalabkaagu wuxuu ku keeni doonaa bogga saxiixida. Geli **FMSOne** emailkaaga iyo eraygaaga sirta ah, dabadeed guji **Log In**.
4. Hadda waa in aad saxeexday oo aad diyaar u tahay inaad bilowdo shiftiga shaqo beddelka!

#### Bilaabida Shift Starting a Shift

Markaad soo gasho, shaashadda ugu horreysa ee aad aragto waa inay noqotaa liiska ka qaybgalayaasha ee aad u shaqeysyo. Waxaa laga yaabaa inuu jiro hal qof oo keliya, ama waxaad yeelan kartaa dhowr.

1. Guji magaca qofka aad manta shaqaynayso.
2. Halka hoose ee shaashadda waxa ku yaal badhanka "**Start Shift**" oo buluug ah. Guji taas
3. Waxaad u baahan tahay inaad xaqijiso inaad dooratay qofka

saxda ah, haddii aad dooratay, guji **yes (haa)**. Haddii aadan samayn, guji **no (maya)**.

4. Haddii aad gujiso haa, **evvie** waxay durba bilowday duubista shaqadaada. Meelayaad dhigi kartaa qalabkaaga oo dib ugu soo laaban kartaa mar dambe.

#### Dhammaadka Shift

Kahor intaadan gudbin shaqadaada, waxaad u baahan doontaa inaad geliso/doorato maclummaad ku saabsan isbeddelka app-ka.

1. Fur app-ka.
2. Ka dooro koodka adeegga (service code) liiska.
3. Liiska ka dooro aqoonsiga diiwaangelinta ka qaybqaataha.
4. Haddii uu u baahdo barnaamijaagu, dooro ADL ama kood-hawleedka kaas oo aad maanta ka shaqeysay.
5. Guji **End Shift** ee dhinaca midig ee sare ee shaashadda.
6. Guji **End and Complete Shift** ee meesha soo baxda.
7. Waxedaad arki doontaa fariin ah in shaqadaada si guul leh loo kaydiyey/xereeyey.

Hambalyo! Waxedaad ku duubtay shaqadaada app-ka mobaylka **evvie**.